
# “GASO, GANUUN IYO GASIIN”

## Aragtida horumarinta reermiyiga ee lagala dhex bixi karo

*Caliqeyr M. Nuur*
*07 Agoosto 2023*
*Caliqeeyr@gmail.com*




**Xogta guud ee buugga**

Magaca: Gaso, Ganuun iyo Gasiin
Qore: Prof. Cali Jimcaale Axmed
Daabaca 1aad: 2018. Sweden
Madbacadda: Laashin Publishers and Publications
Tirada bogagga: 219
ISBN: 978-91-639-4173-3

**TUSMO**


Arar ....................................................................................................................... 3

Ereyfur ................................................................................................................... 3

Barakaca reermiyiga .............................................................................................. 3

Soo-galootiga magaalada ....................................................................................... 5

Dhibka haysta soo-galootiga cusub ....................................................................... 6

Dhibka ay geystaan soo-galootiga cusub ................................................................ 8

Horumarinta reermiyiga ......................................................................................... 9

Aragtidayda gaarka  ah ee sheekada .................................................................... 11

Gunaanud ............................................................................................................. 13

Tixraac ................................................................................................................. 14

## ARAR

"Gaso, Ganuun iyo Gasiin" waa buug ka hadlaya dhacdo qoys reermiyi ah oo ku jira barakac aan la ogayn goor uu soo bilowday iyo heer uu ku xasilay labadaba. Waa geeddi uu dhib weyn ka muuqdo balse nolosha reerguuraaga naga tusaya afar xagal oo kala ah: i) dhaqanka iyo caadooyinka, ii) gumarada iyo dhaqandhaqaalaha aasaasiga u ah, iii) ka falcelinta saamaynta taban ee cimilada iyo aafooyinka dabiiciga ah, iyo iv) doorka ay ku yeelan karaan nolosha dhiggooda reermagaalka ah. Afartaas dacal ee uu qoraagu si xirfadaysan sheekada ugu cabbiray ayay qormadani isku deyaysaa in ay ka soo tuujiso xalka, ama tabihii looga hortegi lahaa saboolnimada iyo barakaca ay reerguuraagu magaalooyinka ugu hayaamayaan. Sidaas awgeed, qormadani waxay tusaale nool ka dhiganaysaa sheekada uu buuggu werinayo oo lafteedu ah farriin cilmiyeed balse la suugaameeyay. Maxaan sheekadan ka baran karnaa? Maxaase xal u ah aafooyinka aan qaarkood lagu baraarugin ee ay bannaanka keentay? Labadaas weydiimood iyo weliba iimaha ama ammaanta ay sheekadani leedahay ayaan gorfaynta ku kormari doonnaa.

## EREYFUR

1. **Gumaro:** Lafo; raasamaal, gundhigga hantida.
2. **Gurgur:** Qalab; alaabaha guriga yaal inta aan ka ahayn goglaha, rarada, dharka iwm.
3. **Hedel:** Hawl uu wehliyo fal, socod ama dhaqaaq jirka ah.
4. **Meesi:** Xoolaha la dhaqdo, sida ariga, geela, gammaanta iyo lo'da.
5. **Saabaan:** Alaabaha guryaha inta aan ka ahayn weelasha iyo qalabka yaryar.

## BARAKACA REERMIYIGA

Reermiyi iyo reerguuraa waa laba erey oo isku si loo adeegsado balse wax yar uun ku kala duwan. Astaanta ugu weyn ee labadooda kulmiso waa in ay yihiin dad uu cufkooda bulsheed yar yahay, kuna nool meel aan degmo ama magaalo weyn ahayn. Sida ereyada ka muuqata, reerguuraagu waa bulsho guurguurta oo aan negaadi sugan lehayn. Waxaase jiri kara reermiyi aan reerguuraa ahayn, sida qoys beeraley ah, ama reero yar oo si filiqsan ugu negaaday dhul magaalada ka durugsan. Inta badan Soomaalidu waxay reermiyi u taqaan reerguuraaga aan meelna ku negaan. Waa dad leh xoolo tirsan, gurgur iyo saabaan fudud oo ay awrta ama dameeraha ku rartaan xilliyada geeddiga. Noloshoodana waxaa u taliya saddex-xagalka kala ah *xoolaha, daaqa* iyo *biyaha*. Xilliyada jiilaalka waxay meesiga ula guuraan meelaha xaabka leh – waa caleentii geedaha ka daadatay iyo cawska dumaaga ah. Sidoo kale, kama fogaadaan ilaha biyaha sida ceelasha, waraha ama hilooyinka webiga. Sababtuna waa in uu meesigu aad u oomo xilliyada jiilaalka iyo xagaaga, loona baahan yahay waraabin joogta ah. Ilo-biyoodkaas maadaama lagu soo noqnoqdo, ayay dadka qaar ka dhex arkaan kansho ganacsi. Sidaas darteed ayay ka furtaan goob ay ku iibiyaan agabka aasaasiga ah oo ka waabtaan balbalo iskugu jirta dukaan iyo maqaaxi. Marmarna waxaa dhacda in ay culumada dariiqooyinku saldhigtaan ishaas biyaha agteeda kana dhistaan mowlac ay diinta ka fidiyaan. Tuulada Siciid Maxaad Raage oo ay sheekadani ka ambaqaadayso ayaa sidaas ku deegaamowday kaddibna ku

hodontay. Sida uu xusay qoraagu, *"waxaa deegaanka lagu yiqiin taakulaynta iyo gacanqabadka macyuub kastaa oo degaanka degganaa ama dabeyshi ku yimid amaba dool ah*" (Gaso, b. 8). Inta badan, meelba ciddii u soo horreysay ayaa loogu magacdaraa haddii aanay jirin astaamo kale oo ka awood badan. Waxayna u badan tahay in Siciid ahaa qofkii u horreeyay ee ku xasilay tuuladan barakowday.

Ilaha biyaha waxaa marmarka qaar ka dhaca loollan ku saabsan toogaysiga waraabka ama weliba lahaanshaheeda. Sidaas oo kale waxay ka dhacday warihii tuulada Siciid Maxaad Raage iyo deegaanka ku xeeran oo ay hareeyeen loollan, dhagar iyo kala fogaansho ragaadisay wada-shaqayntii bulshada. Sida uu qoraagu xusay, deegaankaas waxaa isu kaashaday *"Abaaro isdabajooga, abaaro dadku isukeeneen, abaaro oo sii xoojiyay in xasadku tarmo, luggooyaduna sharaf noqoto"* (Gaso, b. 8). Kolka uu hoos u dhacani yimid waa markii uu dhintay wabarkii deegaanka ee ahaa xarigga isku hayay beelaha tuulooyinka deriska ah. Waa nin ay darajadiisu gaartay in loogu yeero Wabarkii Wabarrada. Inta badan dumarku door weyn kuma laha talada guud ee bulshada reermiyiga ah. Sidaas ha ahaatee, tuuladan ay sheekadu dooratay waxaa u kacaya haweeney la yiraa Gobeey Biyow Yerow oo u hedlanaysa waanwaanta dadkeeda – waa bulsho kala beelo ah, se ay danta guud isku tolayso. Iyada oo ka timid tuulada Raqayle ayay Gobey maanso kula hadlaysaa reer Siciid Maxaad Raage. Waxay ku oran:

*"I sii iyo I sii; kuu roobimeysee;*
*subeentaan bireeya;*
*ee sinnaan noogu qaybsha. (b.17*)

Haddii ay dadka tuulooyinku heshiin waayaan; haddii ay wadashaqayntoodu xumaato; haddii la waayo dawlad soo faragelisa ama loola irkado is maandhaafka beelaha, waxaa dhacda in tuuladii lagu kala guuro. Sidaas oo kale ayaa ka dhacaysa tuuladii Siciid Maxaad Raage oo lagu kala irdhoobayo. Warihiina way iska gurayaan maadaama aanay jirin midnimadii lagu dhisay laguna dayactiri jiray. Kolka ay sidaas iyo si la mid ah ku dumaan tuulooyinka curadka ah waxaa dhacda in dadku u qaybsamaan laba, i) qaar magaalooyinka u hayaama iyo, ii) kuwa raadsada cid u xoolo-kaasha kaddibna noloshoodii reerguuraanimo dib ugu noqda. Cidna nafteeda kuma eedayso in ay ka gaabisay xal ay keeni kartay. Badanaa, cid kale ayaa eedda la saaraa, marmarna hubaasha ayaa laga beyraa markaas baa uuman qarsan la eersadaa. Halkan, reerkii ay cimilada, cilmiyarida iyo qorsha la'aanta dawladeed aafeeyeen ayaa eersanaya quraafaad markaas bay hooyadii qoysku oranaysaa, *"Eebboobow, intey inkaartu nooga timid"* (Gaso, b. 98). Habka ay dhacdooyinka sheekadu u xiriirsan yihiin ayaa laga garanayaa in aanu arrinku inkaar ahayn balse uu yahay dhib ay indheergaradku sida Gobey iyo aynigoodu sii oddoroseen balse aan laga sii hordhicin. Sida uu qoraagu u dhigay, *"Oof kastaba iinteeda ayay sii shaacisaa"* (Gaso, b. 4) aafadani waxay ahayd tu iimaheeda sii carisay.

Dadyowga adduunka, gaar ahaan Soomaalida, tuulooyinku waa negaadiga koowaad ee ay reermiyigu ku xasilaan, kaddibna iyadii ayaa u magaalowda oo ay ku waaraan, ama waxay uga sii gudbaan magaalo kale oo ay dano gaar ah ugu xisheen. Reer Toxob oo ka mid ah jilayaasha sheekadan, kolkii ay ku hungoobeen nolosha tuuladii Siciid Maxaad Raage waxay *"... dantu*

*ku kalliftay in ay ka soo xaabxaabtaan wixii ay lahaayeen, goor dhabbar ahna ka guuraan kobtii ay ka soo gaareen isirkood."* (Gaso, b. 23). Qoysaskani marka ay magaalada weyn yimaadaan waxaa loogu yeeraa – *galti, koyto* ama *soo-galooti,* waana danyar aanay jirin wax rajo ah oo dhankii miyiga ka xiga.

## SOO-GALOOTIGA MAGAALADA

Soo-galootiga magaalada ee miyiga ka yimaad waxay ka dhigan yihiin qaxooti dadban. Waa bulsho u nugul aafooyinka dabiiciga ah sida daadadka, duufaannada, abaaraha, iyo dabka kaymaha qabsada. Dhacdooyinkani waxay dhaawici karaan kaabayaashoodii nolosha, sida beeraha, daaqa, xoolaha, biyaha iwm. Is beddel yar oo lamafilaan ah ayaa si fudud u murjin kara hab-nololeedkii xasilnaa oo dhan. Tubta ay badbaadada ka doonaanna waa inay ka hayaamaan deegaankooda iyaga oo raadinaya deegaan nabad ah ama ay xasillooni dhaqaale ka jirto. Sidaas oo kale, Toxob Samasuge isaga oo reerkii ku gashiimay meel Muqdisho daafteeda ah ayuu sahan u soo aadayaa magaalada. Ma aha sahan naqeed ee waa sahan uu dad uun jerinayo — soo-galooti hore oo sida isaga oo kale u soo barakacay ayaa ka soo horreeya. Ma aha xafiis dawladeed waxa uu ku hiranayo balse waa haybtiisa guud oo u ah ciirsiga kama-dambaysta ah. Sida ay xaaladdu u eg tahay, qaxootigu wuxuu qaxooti ku noqdaa wadarnimada, balse marka uu keli yahay ma muuqdo ama waxaa loo arkaa qof deegaanka marti ku ah. Inta badan, xigaalada uu barakacuhu soo haybsanayo iyaguna waa dad noloshooda la hardamaya, waxa ay awoodaanna waa soo dhoweyn iyo kaalmo aan joogto ahayn oo qura. Qofkaas yimid waxaa hortiisa ah magaalo weyn oo aanu aqoon sida loogu noolaado. Kama horreeyaan xafiisyo dawladeed oo danyarta kalkaala, hay'ado siiya gargaar soo dhoweyn ah iyo xirfad uu ka shaqaysto, ama ugu yaraan wax caymo ah oo uga soo noqda canshuurtii laga qaadi jiray marka uu suuqa xoolo keensado. Sidii firo ay dabayshu bitinayso ayay baahidu u riixaysaa, intooda badanna ma laha qorshe ay isku hubaan.

Toxob Samasuge, isagu wuxuu magaalada ka degayaa meel ay dani badday balse ay dadkii ku soo dhoweeyay mar labaad ku waaninayaan in uu ka guuro. Dadkaas u naxay ee geeddiga labaad kula talinaya waxaa ka mid ah lammaane gaboobay oo la kala yiraa Shiil iyo Caanood. Qoyskani waxay Toxob u ahaayeen deris iyo garab, laga soo bilaabo xilligii adkaa ee uu magaalada soo galay iyo xilligan weli adag balse uu la qabsaday. Caanood oo xaalkiisa ka welweshay ayaa turaal u oranaysa, *"Waxaan kugu la talin lahaa in aad meeshaan ka guurtaan sida ugu dhaqsiyaha badan*." (Gaso, 198). Dabcan waa sabab iska muuqata balse Toxob markii uu haweenayda warsaday ujeedka ay geeddiga ugu waaninayso ayay haddana ku ornaysaa, *"Waxaan meeshaan niil muddo aan yarayn. Kaawadu waxay naga gashay dhiigga iyo dhuuxa. Saas oo ay tahay haddana waxaa meesha nagu haayey in aan lammadayna oo keliya kobtaan muddo ku noolayn. Adigase waxaad mas'uul ka tahay isuma qaddo"* (Gas, 198). Beryo gaaban ayay wada dhiman doonaan Caanood, Shiil iyo Toxob, ilmihii uu Toxob ka dhintayna mar labaad ayay geeddi geli doonaan. Waa sidaas xaaladda soo-galootigu oo haddii aanay helin dib-u-dejin dawladeed waxay sanado badan ama dhowr fac oo isxiga ku jiraan guurguur magaalada dhexdeeda ah. Waa dad karti badan balse maadaama ay waayuhu ka iisheen aan heli karin aqal rasmi ah, meherad ganacsi, shaqo joogto ah iwm. Inkasta oo ay magaaladu tahay

meel barakacayaasha u balanqaadaysa in aanay maalin dhan qadin, haddana waxay qabaan dhib hoose oo iyaga u gaar ah.

## DHIBKA HAYSTA SOO-GALOOTIGA CUSUB

Magaalaynta degdegga ah, iyo weliba hayaanka reermiyiga ka daldoorsanaya noloshii waxsoosaarka beeraha iyo xoolaha ku tiirsanayd waa laba dhib oo casrigan aad looga dareemay dalal badan. Reermiyigu kolka ay hayaamayaan ama dhib ayay ka cararayaan ama dheef kororsi ayay doonayaan. Xagga Soomaaliya, inta badan saboolnimo ayaa reermiyiga u jiidda dhanka magaalada. Waxaa tusaale u ah qoyska Reer Toxob ee iyaga oo fara-maran soo degaya jafka magaalada Muqdisho. Yuu ku ciirsan doonaa? Ma cid dagan ayuu dhici doonaa? Ma cid ladan buu baryi doonaa? Ma shaqo uu miyiga ku yiqiin ayuu magaalada uga xoogsan doonaa? Ma aqal roon buu degi doonaa? Mise xaafadaha isku-raranta ah ee dembiyada badani ka dhacaan ayuu ilmihiisa dejin doonaa? Ma waxaa jira guryo ay dawladdu ugu talagashay dadka hoy la’aanta ah oo halkaas bay qoysku degi doonaan? Mise derbiyada waaweyn ayay dhinacooda waab ka binaysan doonaan? Lama hubo dhibka ay qaxootigan dadbani soo kordhin karaan, waxaase muuqata in ay iyagu ku jiraan dhib iyo hubanti la’aan.

Toxob Samasuge kolka uu magaalada soo galo, wuxuu arkayaa rag badan oo meel kabdhood ku ciyaaraya. Laga yaabee in ay shaqo la’aan yihiin, marka loo eego waqtiga dheer ee ciyaartaan loo hedlan yahay. Laga yaabee in ay yihiin xubno ka tirsan qoysaskii miyiga ee sida siimowga ugu soo hayaamayay nolosha magaalada. Cagoole oo ka mid ah dadka kabdhoodkaas u soo daawasha tago oo isaguna malaha shaqo la’aan ah ayay halkii isku baranayaan kaddibna wuxuu geynayaa aqal fiddow lagu aqrinayay. Dabcan waa aqal tolnimo loogu hagaagay, isaga ayaana ka mudan xafiis ama hay’ad kasta ee dawladeed ee danyarta laga gargaari lahaa. Toxob, haddii uu miyigiisii ku arki lahaa dawlad ku taageerta xarun waxbarasho, xarun caafimaad, ceel biyood, taakulada tacabkordhinta reermiyiga, ama ugu yaraan adeegyada aasaasiga ah, maba yimaadeen magaalada. Isaga ayaa noqon lahaa il dhaqaale oo dalag, duunyo iyo canshuurba laga helo. Saddexdaas faa’iido ee lagu qabi lahaa haddii uu Toxob miyigiisii joogo ayaa haatan guray.

Sida sheekada ka muuqata deegaanka uu qoyskani ka soo qaxayo waa miyiga Shabeellada Dhexe. Mar uu qoraagu marashada reerka tilmaamayay wuxuu yiri, *“Uma ekayn dad ka soo guuray dhoobeey ama dooy”* (Gaso, b. 182). Ujeedku waa in ay ka soo guureen dhul dhoobeey ah oo haddana Xamar looga soo lugayn karo *“... carro ama guri waqooyi oo loola jeedo wixii Xamar waqooyi ka xiga*” (Gaso, b. 8). Dhulkan ay sheekadu ka dhacayso, marka loo eego lahjadda oo ah tii beesha Abgaal; in uu yahay dhul carro-dhoobeey ah, dhul aan Xamar ka fogayn, haddana docda waqooyi ka xiga, wuxuu u muuqdaa Shabeellada Dhexe. Carrigani wuxuu ka mid yahay deegaannada ugu hodonsan dhulka ay Soomaalidu degto, reermiyiga ku noolna waxay ka mid yihiin kuwa uga ladan xoola-dhaqatada iyo beeraleyda dalka. Labada Shabeelle waa carriga ay xilliyo adag Soomaalidu ku badbaadday sida abaartii Dabadheer ee 1974, iyo dagaalkii 1977 ee Soomaaliya iyo Itoobiya. Waxaa la oran karaa, reermiyiga kale ee Soomaalidu beerasho ayay u go’aan, ama xoolo-raacasho. Si taas ka duwan gobalkan waxay

dadkiisu u baalideen xirfadda bar iyo beer isku dhafan oo weliba si isu dheellitiran looga faa'iidaysto. Taasi waa tayo la rabay in ay dawladdu hormariso, wasaaradaha ay qusaysana u sameeyaan qorshe waarin kara. Sida barakacayaashii aynigiisa ahaa ayuu Toxob reerkii ku furayaa meesha magaalada ugu liidata – waa Kaawa Godeey, intii aanay samayn horumarka maanta ka muuqda. Sida ay qisadu werinayso *"… reerkiisii ayaa degay kaawada salkeeda hore si ay kaga badbaadaan urka inta badan ka soo butaaca dhinaca shishe ee kaawada. Waxaa meeshaa hoy ka dhigtay halaq ay ka mid yihiin …*" (Gaso, b. 191). Danyartii halkan degganayd oo iyaguna deegaanno kala duwan ka soo naqraacay ayaa astaan u ah dhib kasta ee ay soo-galootigu mudan karaan haddii aanay jirin faragelin togan oo dawladeed.

Kaawadu waa meel badda dacalkeeda ah oo laga qodo dhagax jilcan oo guryaha lagu dhiso, waana shaqo adag oo looga faa'iidaysto muruqmaalka ay dani hayso oo qura. Halkaas ayuu Toxob ka shaqa bilaabayaa, waxaana u curanaya nolol ka duwan tii caafimaadka iyo gobannimada lehayd ee uu ku soo barbaaray. Goobaha kaawadu waxay leeyihiin budul dhagaxa ka firooba oo afka qalaad lagu yiraa *'quarry dust.*' Waa boor halis ku ah sambabada noolaha, dadkuna waxay ka qaadaan oof ay geerideedu dhowdahay, carsaanyow, iyo jirrooyin daran oo neefmareenka haleela. Budulkan oo haddii aan la xakamayn noqda jirrooyinka hawada laga qaado ayaa halis weyn dhaliya kolka uu saameeyo marin-biyoodyada; ku faafo hawada; la soo dhaco roobka, ama uu si joogto ah u dhaado oogada qofka. Weli kaawooyinkani way ka jiraan daafaha Muqdisho iyo magaalooyin kale ee waaweyn, danyartuna waxay ka shaqeeyaan iyaga oo aan wadan qalabkii badbaadada shaqaalaha. Waxaa jira wasaarado ku magaacaban caafimaadka, shaqada & shaqaalaha, bey'ada & deegaanka, iwm. Balse, maadaama aanay hay'adahaasi xil iska saarin badqabka dadweynaha, shaqaale badan ayaa u le'anaya jirrooyin agab yar iyo aqoonkororsi looga gaashaaman karay. Nasiibdarro, Toxob iyo curadkiisii Jabaq, iyo weliba rag kale ee iyaguna magaalada ku soo dhoweeyay ayaa si degdeg ah ugu dhimanaya saamayn ay kaawadaasi ku yeelatay caafimaadkooda.

Caanood oo ka mid ah dadkii reer Toxob kaawada ku soo dhoweeyay ayaa magaalada ku sifeynaysa *"keento, koolkooliso, kobciso, kibriso, kufiso"* (Gaso, b. 198). Dabcan cufka bulsheed ee magaalada weyn ayaa *"keento"* ah oo isaga ayaa soo jiita kolka ay dadku miyiga ku abaarsadaan. Haddana waa *"koolkooliso"* oo ciddaasi markii ay magaalada soo gasho waxaa u gurmada xigaaladii, sida Toxob loo soo dhoweyeeyay oo kale. Isla maalintii uu sahanka ahaa ee uu aqalkii fiddowga lagu aqrinayay yimidba farqaha ayaa loo buuxiyay. Isaga oo la yaabban badnaanta raashinka la siiyay ayuu oranayaa *"Eebbowyaal, intaas oo dhan ciddu uma baahna ee xoogaa akhyaarta kale u dhaafa*" (Gaso, b. 165). Kaddibna xigaaladu waxay ka kaalmeynayaan in uu reerka magaalada soo geliyo, meel ka dego, shaqana helo oo uu dhab u negaado. Balse koolkoolintani waxay dhammaataa marka intaas loo qabto.

Beelaha dega Shabeellada Dhexe iyo Shabeellada Hoose qaarkood ayaa berigii hore waxay caan ku ahaayeen soo dhoweynta dadka dhulkooda u soo barakaca. Gargaar horudhac ah ayay siin jireen, kaddibna beer ayaa loo hibeeyaa oo lala tacbaa. Kolka la hubsado in ay ciddaasi xasishay oo ay dhowr kiintaal oo guga xiga gaarssiin kara u tiirsan yihiin ayaa lagu yiraa, *"kuma baryeyno ee ha na baryin, kaamana tegaynno ee ha naga tegin.*" Ujeedka weedhu waa – isku filnow, danta guudna ka qaybqaado. Se, magaaladu way ka duwan tahay miyigaas ay

ladnaantu tiil. Sidaas awgeed, Toxob markii uu beryo badan magaalada joogay ayuu dareemay dhibkeedii iyo horumar la'aan. Waa heerka *"kibriso"* lagu sifeeyay ee uu qofku ku qanci waayo noloshii uu ku sugnaa, waa heer aanay koolkoolintii hore jirin, ama aanu heli karin qorshe fog oo ay dawladi u dejisay. Heerkani wuxuu soo-galootiga u abuuraa xaalad uu kala doorto in uu horukac sameeyo ama uu kufo. Waa sababta heerkan *"kufiso"* loo yiri oo mar kastaba horumarka soo-galootiga waxaa dabraya dheelliga u dhexeeya dhaqaalaha ay samayn karaan iyo dalabka nolol maalmeedka magaalada. Sababtu waa kolkii ay magaalada soo galeen ayay bilaabeen shaqooyin adag oo caafimaad darro u horseeda, ama waxaa u bilaabantay nolol adag oo aanay helin nafaqadii fayadoodi ilaalin lehayd. Gaar ahaan waayeelka danyarta ahi waxay ku dhintaan da' ka hoosaysa heerkii gabowga. Haddiise aanay helin jid kale, waxaa laga yaabaa in ay ilmihii ay waalidkaasi ka tageen iyaguna ku dhex meeraystaan garaangataas saboolnimada ah.

## DHIBKA AY GEYSTAAN SOO-GALOOTIGA CUSUB

Barakacayaasha dadban, ama soo-galootiga magaaladu waa dad intooda badan raadinaya dano ay deegaankoodii ka waayeen. Waxay jerinayaan fursado dhaqaale, daryeel caafimaad, waxbaraso, nabadgelyo ama haddii si guud loo dhigo horumar nololeed. Markoodii hore, dadkani waxay ahaayeen reero isku filan oo magaalooyinka u iibgeeya dalag, xoolo nool iyo badeeco kale oo waxtar leh. Waxay ahaayeen ilo ay dawladdu canshuur ka uruursato, reermagaalkuna ay ka helaan badeeco jaban oo tayo leh, isla markaana door weyn ayay ku lahaayeen xasilloonida dhaqandhaqaale ee dalka. Sida ay xustay hay'adda Qaramada Midoobay, ku dhowaad 68% dadka adduunka ayaa la saadaalinayaa in ay ku noolaan doonaan magaalooyinka sanadka 2050, (UN. "World Urbanization Prospects," 2018). Halkan waxaa ka curta dhib laba afle ah oo marna saameeya kaalintii ay reermiyigani ku lahaayeen deegaankooda, marna culeys ku ah magaalada. Waxay sii murjiyaan kororka tartanka shaqooyinka taas oo sare u qaadda shaqa la'aantii hore u jirtay. *"Soo-galooti badan ayay noloshu la gashaa muruqmaal adag balse aan rasmi ahayn, halistiisuna badan tahay"* (Bhagat, R.B., 2004). Sida ay sheekadani xusayso Toxob kolkii uu magaalada yimid waxay dadkii ka soo horreeyay dejinayaan meel kaawada u dhow, wuxuuna shaqo ka bilaabayaa kaawa-jebintii is miidaaminta ahayd. Shiil oo ka mid ah dadkii miyiga ka soo hayaamay ayaa durbadiiba noqonaya *"…xeeldheere looga dambeeyo isticmaalka walxaha qarxa ee salka u ah kaawa qodidda iyo dhagax jebinta. Waxaa uu hawshaas hayey muddo sagaal sano ah. Waxaase hawshii nacsiiyey maalintii uu nin ay saaxiibbo ahaayeen lug iyo gacan ku beelay god uu ka qodayey meel aan wax saasa u jirin goob uu Shiil saacado ka hor ku soo xiray walxaha qarxa"* (Gaso, 194). Waxaa dhici karta in aanu Shiil naafayn saaxiibkii oo qura balse ay jiraan dhibbanayaal kale oo qarsan. Odaygani, kolkii uu sidaas shaqadii ku nacay ayuu mar labaad u xuubsiibanayaa fiqiduur oo ah xirfad dhaqtarnimada u dhow. *"Waxaa la arkay isaga oo wax ka qabta ama daweeya cudurro ay ka midyihiin jadeecada, busbuska, miciyowga, af-burburka, xiiqdheerta, …*" (Gaso 194). Si taas ka duwan, xaaskii Shiil oo iyaduna ah dadkii miyiga ka soo hayaamay ayaa noqonaysa waxsheeg ka faaliya waayaha qarsan, dadkuna ku kalsoonaadaan fal kasta ee ay kula taliso. Labadaan xubnood, waxay tusaale nool u yihiin geeddi-socodka nolosha bulshada soo-galootiga ah ee magaalada ku tabaalooba. Waa dad hal-

abuur badan, afyaqaan ah, mana waayaan tabo ay ku xoogsadaan. Inta ay naftooda halis gelinayaan iyo waxaa isla eg inta dadka kale halis gelinayaan.

Kolka aad magaalada Muqdisho dhexgasho waxaad arkaysaa muruqmaal ku hawlan xirfad aanu aqoon dhab ah u lehayn. Waxaa meelo badan kaaga muuqanaya meheradaha muddawaadka, waxsheegga, mingiska, cilaajka iyo kuwa badan oo baaqyadooda codbaahiye ku naadinaya. Qofna hawl la’aan meel uma fadhiyo; waa la kala adeeganayaa; cidna ma hubiso tayada adeegga iyo badeecada cidda kale. Sidaas ha ahaatee, tayadhowrka dawladdu wuxuu inta badan xoogga saaraa dawooyinka iyo cuntada dibadda laga soo waarido ee dekadaha ka soo gala.

Soo-galootiga cusub, intooda badan waa dad miyiga ka yimid oo leh dhaqan ay xeeriyaan. Caan kuma aha xatooyada, dhaca, ka ganacsiga jirka, adeegsiga maandooriyaha iwm. Waxaa la oran karaa in badan ayay ka dhowrsan yihiin dadka reermagaalka ah. Balse dhaqankaasi ma raago oo wuxuu ilaa heer ku koobnaadaa waayeelka. Ilmihii miyiga laga keenay waxaa ku dhaca dhaqan-wareer, sababta oo ah kuma dhex korin dhaqankii beeshooda, magaaladana kuma helin waxbarasho iyo tusaale wanaagsan. Si ay uga haqab beelaan dhaldhalaalka qaaliga ah ee magaalada, waxay u baahdaan dhaqaale degdeg ah. Baahidaas ayaa ku qaadda, dhac, xatooyo, adeegsiga maandooriyaha, ka ganacsiga jirka, iyo falal badan oo xasilloonida bulshada saamayn taban ku leh. Jiilkaan saboolka ah waxay noqdaan xaabada hurisa kooxaha argaggixisada ah, ciyaal-weerada, jirrooyinka faafa, iyo weliba inta badan dembiyada fudud ee magaalada ka dhaca. Arrinkani waa aafo qaran oo dahsoon, ka hortagga ugu saamaynta wanaagsanna waa horumarinta reermiyiga.

## HORUMARINTA REERMIYIGA

Reer Toxob oo ah qoyska ay sheekadu ku saabsan tahay waxay ku soo sabooleen tuulo hore, kaddibna waxay soo degayaan Siciid Maxaad Raage oo ay ku ladnaanayaan. Sababo dhaqanka iyo deegaanka la xiriira ayaa haddana tuuladan dambe looga wada guurayaa. Meel Biyacadde la yiraa ayay beryo ku negaanayaan iyadiina waxay ku weynayaan labadii neef ee xoolo oo dhan uga haray. Mar saddexaad waa kuwii Xamar u soo guuray ee kolkii ay aabbihii qoyska iyo curadkiiba ka dhinteen haddana dib ugu qaxaya miyigii Biyacadde. Lama oga in ay halkaasna ku waari doonaan, balse maadaama ay qoys gaar ah yihiin, haddana waxay tusaale u noqon karaan bulshada guud ee reermiyiga ah.

Si loo helo bulsho isu dheellitiran iyo dhaqandhaqaale xasilan oo waara waxaa mahuraan ah in qorshaha qaranku noqdo mid u siman miyiga iyo magaalada. Inta badan doodaha la xiriira xuquuqda iyo sinnaanta bulshada, diiraddu waxay fuushaa arrimaha jinsiga, sedbursiga beelaha iyo deegaannada qaarkood balse hoos looma dhugto sinnaan li’ida habnololeedka ku salaysan ee qaybinta adeegyada dawladda. *“Falanqeeyayaasha qaarkood ayaa ku dooda in habka ugu waxtarka badan ee lagu horumarin karo bulshada miyiga ay tahay qorshe hoosta laga soo dhisayo iyaga oo awood loo siinayo in ay qeexaan baahidooda gaarka ah, halkaasna laga dhiraandhiriyo kala hormarinta mashaariicda”* (Ward et al., 1998, b. 29). Maadaama waxa

ugu badan ee ay reermiyigu u soo guurayaan tahay saboolnimo ama horumar la'aan nololeeed, dawladdu waxay dhiirrigelin kartaa socodsiinta iyo gadashada badeecadaha ay soo saaraan. Waa bulsho beeraleey ama xoola-dhaqato ah, waana laba habnololeed oo u nugul is rogrogga sicirka suuqa iyo tartanka kaga yimaad shirkadaha qalaad ama ganacsatada dalka ee dibadda wax ka soo waarida. Sidaas awgeed, afar arrimood ayaa noloshooda waxtar ku kordhin lahaa. Tan koowaad waa kabitaan dhaqaale oo ah qoondo ka falcelin karta xaaladaha suuqa ka jira, isla markaana u suuragelin karta in ay badeecadooda ka sameeyaan faa'iido ka sarreysa baahidooda aasaasiga ah. Tan labaad, waa dejinta qorshe isku xiraya golayaasha ganacsatada gudaha iyo bulshada reermiyiga, isla markaana hubin ku sameeya in uu xiriirkoodu yahay wax is weydaarsi caddaalad ah. Tan saddexaadna waa xakamaynta badeecadaha dibadda ka imaanaya si aanay ciriiri u gelin waxsoosaarka reermiyiga gudaha. Tan afaraadna waa ka hortagga gargaarka shisheeye oo si toos ah u cuuryaamiya waxsoosaarka beeraleyda gudaha, maadaama intiisa badan lagu soo beego xilliga uu soo go'o dalagga beeraha dalku.

Jiritaanka waxbarasho tayo leh ayaa iyaduna reermiyiga ka kaalmayn karta in ay deegaankooda ku negaadaan. Inkasta oo ay tahay arrin miliqsan, haddana dawladdu waxay cilmibaaris iyo horumarin ku samayn kartaa qorshayaal lagu kobcin karo bulshada magaalooyinka ka fog. Ololihii af Soomaaliga ee 1972 dalka ka hirgalay ayaa tusaale u noqon kara habka waxbarista reerguuraaga. Si taas ka duwan, beeraleyda negaadiga ah waxaa hadba tuulada ama degmada u dhow looga hirgelin karaa dugsiyo ay dawladdu ka shaqaaleysiiso barayaal taya leh. Waxaa kale oo bulshadan itaali kara baahinta waxbarashada dadka waaweyn, aqoon-kororsiyada gaaban iyo ololayaasha wacyi-gelinta. Marka laga yimaad waxbarashada aasaasiga ah, aqoonta gaarka ah ee kobcin karta horumarka reermiyigu waa tan la xiriirta xirfaddooda. Maadaama ay u laba-bogleeyaan beeraha iyo xoolaha nool, waxaa anfacaya barnaamijyo la saanqaadaya ama soo dhoweyn kara horumarka casriga ah ee goobahan ku soo kordhay. Dalalka horumaray iyo weliba kuwa soo koraya waxay aad u dhiirrigeliyaan wax la yiraa *"dalxiiska miyiga"* oo ah in ay xoolaleyda ama beeraleydu hantidooda u adeegsadaan hab dalxiis iyaga oo weliba waxsoorkooda suuqa u iibgeynaya. Dalxiiska noocan ahi ma wada dabooli karo saddexda xagal ee horumarka waara, waxaase hubaal ah in uu soo kordhinayo fursado ganacsi, shaqo iyo hal-abuur kale oo nolosha miyiga kobciya. Saddexda xagal ee horumarka waara waxay kala yihiin:

- Bulshada: Waa xagal diiradda lagu saarayo in ay bulshadu (miyi iyo magaalo) u sinnaato fursadaha maalgelinta, shaqada iyo ka faa'iideysiga adeegyada dawladda.
- Dhaqaalaha: Waa xaqiijinta in aanu waxsoosaarku noqon mid gabaabsi geliya kheyraadka dabiiciga ah oo hadhow saamayn taban ku yeelan kara reermiyiga.
- Deegaanka: Waa mudnaan weyn oo la siiyo badqabka deegaanka, sida ka hortagga nabaadguurka, guritaanka ama wasaqowga ilaha biyaha, iyo isu dheellitirka dhulbeereedka iyo daaqsinka furan ee ay reermiyigu heli karaan.

Saddexdaas xagalba way ka aafoobeen bulshadii degganayd tuulada Siciid Maxaad Raage. Warihii biyaha ayaa ka guray, colaado sokeeye ayaa kala irdheeyay, haddii ay dhaqaale ahaan u ladnaan jireenna waxay noqdeen danyar barakacday. Meel kasta uu joogaba, reermiyigu waxay u muuqdaan kuwa intooda badan qarka u saaran hayaan cusub. Sidaas ha ahaatee, marka loo eego xaaladda siyaasadeed ee dalka, Soomaaliya uma dhowa in ay hirgeliso qorshaha

xasilinta reermiyiga, balse ugu yaraan tallaabo dhankooda loo qaado ayaa gundhig u noqon lehayd bilowgii horumarkooda. Dawladda ka sokow, waxaa iyaguna arrinkaan door weyn ku yeelan kara ganacsatada, ururrada gudaha, iyo weliba cilmibaarayaasha arrimaha bulshada, dhaqaalaha, iyo deegaanka.

## ARAGTIDAYDA GAARKA AH EE SHEEKADA

"Gaso, Ganuun iyo Gasiin" waa sheeko udub looga dhigay dhaqaalaha reermiyiga. "Gaso" waa xeradii xoolaha, marna waa erey u taagan meesigii la dhaqanayay. "Ganuun" waa haruubkii xoolaha lagu maalayay balse meteli kara dheeftii xoolahaas laga helayay. "Gasiin" waa badarka, dalagga ama cuntada oo isaguna metelaya waxsoosaarkii beeraha. Hubaal, tani ma aha sheeka-faneed oo qura balse waa cilmi bulsheed oo aqristaha lagu barayo hab-nololeedka reermiyiga, caadooyinkooda, iyo weliba dhibaatooyinka ugu weyn ee waayahooda saameeya.

Doorashada ereyada ee sheekada waxaad mooddaa in aad loogu fiirsaday. Kolkii buugga la dhammeeyo kaddib, magac kastaba waxaa ka dhuroobaya milicsi ujeeddo leh. Bal u fiirso; inta badan dadku kolka ay jirradaan ama basaasaan waxaa korkooda fuula hollob loo yaqaan *toxob* oo sidii leelada oogadiisa uga dhacda – waa halka uu ka imanayo magaca Toxob oo ah aabbaha qoyskan saboolka ah. Mana jiro dhibbane ama sabool aan xagga Eebbe same ka sugin – waana ujeedka magaca Samesuge oo Toxob aabbihiis ah balse hadda u eg same ama natiijo uu Toxob sugayo. Qoyskani waa kii dhowr jeer qaxay, negaaday, cayrtoobay, ladnaaday, marmarna ku dhowaaday in ay faya-qabka dhimirkooda ka shakiyaan. Mar walba jabaq san ama jabaq daran ayaa u soo yeeraysay. Mar baa loo sheegay in sicii iyo ridii xoolo oo dhan uga haray ay rag burcad ahi qaateen; mar baa loo sheegayaa in gabadhoodii ay ruuxaani la tagtay; mar bay maqlayaan aweyti ama dardaarweris shar looga digayo; mar baa loo sheegayaa curadkoodii oo naafoobay ee haddana dhintay. Ma yara jabaqdu – waana halka uu ka imanayo magaca Jabaq oo ah curadka qoyska iyo weliba udubka sheekadu ku tiirsan tahay.

Xigmadda doorashada magacyada ka sokow, waxaad buugga ku arkaysaa awoodda ku takrifalka ereyada oo seeragoys ah. Aftahannada aan sheekadan ka helaynno waa qoyska reer Toxob oo xuddun u ah, Sheekoole oo ah qofka sheekada werinaya, Qore oo ah qofka ninkaas warka ka koobinaya, Prof. Cali Jimcaale oo ah qoraaga buugga, iyo aqristayaal dhacdooyinka qaar ka falcelinaya. Ogaalkey, sheeka-faneedka lakabyadaas leh lagama aqoon maktabadda af Soomaaliga, waana jid cusub oo aanay dad badani aad u dhuuxi karin.

Intii aan buuggan aqrinayay waxaan arkay iimo aan is iri qaarkood waa laga geyoon karay. Dhaliilahaas, sida aan anigu u arkay saddex meel ayay ka muuqdaan. Dhaliisha koowaad waa falcelinta aqristayaasha iyo warcelintii qoraaga oo xirmooyinka buugga ku milan, marmarka qaarna kaa qasaya halkii ay sheekadu kuu maraysay. Sidoo kale, tusaalayaal dheeri ah ama doodo dhex maraya Sheekoole iyo Qore ayaa u ekaanaya sheeko ku dhex jirta sheeko kale. Waa sida ay ila tahay, ee haddii xirmooyinkaan buugga laga saaro, waxaa soo bixi lahaa qisadii Reer Toxob oo saafi ah. Illowse, maadaama ay sheekadani tahay mid ku suubban in loo

adeegsado kaabe waxbarasho, haddii miiddeeda keliya lagu ekaado waxaa ka faa'iidaysan kara aqristayaal iyo arday heerar kala duwan jooga.

Dhaliisha labaad waa ereyo laga maarmo in la faahfaahiyo oo buugga ku badan, sida: *"Qadhabo ama qardhabo ama maqas ama manqas"* (Gaso, b. 179), iyo *"Hinraag ama aadaar ama haar ama jibaad"* (Gaso, b. 197). Waa laga yaabaa in ujeedka qoraagu yahay muujinta hodontooyada afka, haddana waxaa jiri kara aqristayaal badan oo sidaas dhibsanaya. Ereyadan la kahan karo, laba si oo kale ayay sheekada ugu jiraan. Mar waa iyaga oo Maay ah oo ku qoran far ama hab-dhigaal ka duwan kii Maxaatiriga, lagana yaabo in ay ka horyimaadaan filashadii aqristaha ee ahayd in uu hal afguri wax ku aqrin doono. Bal kuwan arag: *Withaaygeey (b. 34). Wal hor lyng aragny (b. 50) Libyng (b. 53) Hillimothowga (b. 177) Etheer (b. 182*). Dabcan, kobcinta iyo horumarinta Maaygu waa xil saaran cid kasta oo af Soomaaliga u hedlan, waxaase mudnaanta leh in ay farriin kastaaba lahaato joogtayn la saadaalin karo. Tan xigtaana waa ereyo af qalaad ah oo aan la fasirin sida: *"alxaajah ummul-ikhtiraac: Necessity is the mother of invention" (Gaso, 23).* Ma laga yaabaa in aad buug af Ingiriis ama af Carabi ku qoran ku arki lehayd laba sadar oo afaf qalaad ah oo weliba aan la fasirin? Waxaan filayaa in daabacaadda xigta laga saari doono murtidaas qalaad, ama la fasiri doono ujeedkeeda.

Dhaliisha saddexaad ee buuggu waa arrimo aan badnayn oo aan is iri waxay horudhac u yihiin dhacdooyin soo socda oo hadhow ayaad dib u soo milicsan doontaa. Tusaale ahaan, sida sheekadu werinayso, *"Waxa ay ciddu ka yaabeen meesha ay hooyadu caano lo'aad oo dhaay ah ka keentay"* (Gaso, b. 178). Reerku waxay joogeen xilli xoolahoodii gedmadeen, meeshuna ay deris la'aan tahay. Sidaas ayay cidda inteeda kale ula yaabtay meesha ay caanahani ka iman karaan. Arrinkan waxaan isla lahaa dib ayuu iska fasiri doonaa balse ma arag. Tusaalaha xigana waa mar ay hooyadii reerku meel ka soo saarayso dhaal uu ka buuxo hilib aanay reerku ogayn sida lagu keenay, kolkaas buu odaygii oranayaa, *"kanna intow ku qarsanaa? Dhaalkase intaad ku haysay?"* (Gaso, b. 112). Waxaa laga yaabaa in uu qoraagu arrinkaas si dadban u muujiyay balse aan anigu ku ambaday sarbeebaha, maldaha iyo farriimaha daahsoon ee uu adeegsanayo. Si kastaba, waxaan jeclaa in boggagga xiga lagu arko milicsi yar oo dhadhan u yeela arrimahaas iyo kuwa la mid ah ee buugga ku jira.

Hubaal, iimaha halkan ku xusan waxaa ku dhaafinaya quruxda warka iyo farshaxanka qoraaga. Dhacdooyinka qisada guud ka baxsanna, waxaad arkaysaa in ay ugu dambayn meel uun uga xirmayaan sheekada. Sida uu yiri Filay Dheere oo jilayaasha ka mid ah, *"Sheekaan la bilinse see loo sheegaa"* (Gaso, b. 158), si la mid ah ayuu Prof. Jimcaale buugga ku bilay dhacdooyin nuxur badan. Doorashada ereyaduna tayo gaar ah ayay leedahay inkasta oo aqristaayasha qaar aanay ka maarmayn in ay qaamuus la kaashadaan. Ereyada *"figo, findhiris, dhanuux, sintool, kidirdhis, tawriir, juribis, uddur"* iyo boqolaal aynigooda ah ayaa bogagga dhex ceegaaga. Inkasta uu buug sheeko yahay, haddana waxaa laga yaabaa in ereyfur loo sameeyaa uu aqristayaasha u fududayn lahaa dhadhanka xogta.

"Gaso, Ganuun iyo Gasiin" inkasta uu yahay buug sheeko, haddana si dadban ayuu u soo bandhigayaa waayaha nolosha ee bulshada miyiga, wuxuuna ififaale nagu tusayaa in qulqulka

reermiyiga ee magaalada soo gelayo uu noqon karo aafo qaran. Wuxuu muujinayaa in horumarinta reermiyigu ay tahay badbaabo guud (miyi/magaalo) iyo weliba tashiilka kheyraadka dabiiciga ah ee dalka. Waa sheeko cilmiyeed oo ka gudubsan ujeedka madaddaalada. Sidaas awgeed, buuggani wuxuu mudan yahay horumarin wax dheeraad ah sii ifisa; iyo koobid ka reebta dhacdooyinka aan xiriirka tooska ah la lehayn. Haddii dacalladaas yar laga dheellitiro, waxaan qabaa in aan buuggan looga maarmin kaabayaasha ardayga ee waxbarashada dalka.

## GUNAANUD

Falanqayntan waxaan ku soo sheegnay in uu buuggani aragti weyn naga siinayo dhaqandhaqaalaha reermiyiga isaga oo xiganayo waayihii Reer Toxob Samasuge. Haddana, nolosha qoyskaas markii aan ku dhererinnay tan bulshada guud ee reermiyiga ah waxaa noo soo baxday gaabiska dawladeed ee weligiisba ka jiray in adeegyada bulshada loo dhoweeyo reerguuraaga iyo beeralayda. Waxaan xusnay in tallaabtii ugu mudnayd ee ay dawlad Soomaaliyeed dhankaas u qaaddo ay ahayd ololihii far Soomaaliga (1972-75), dejintii barakacayaashii ka yimid gobalka Ogaadeeniya (1977), iyo gurmadkii shacabka loo fidiyey abaartii Dabadheer (1974). Sidaas awgeed, falanqayntu iyada oo qirtay awoodda xaddidan ee dawladnimada Soomaaliya, haddana waxay israacisay muujinta baahida loo qabo qorshe heer qaran ah oo tayayn kara nolosha reermiyiga, iyo weliba talooyin kooban. Ugu dambayn, waxaan filayaa in qorayaasha sheekooyinka hal-abuurka ahi maanka ku hayaan in ay hawlahooda suugaaneed u adeegsadaan bidhaaminta dhibka jira, kobcinta dhaqanka san, iyo weliba xalka arrimaha saameeya nolosha bulshada. Qoraaga “Gaso, Ganuun iyo Gasiin” isagana waxaan u dirayaa hambalyo weyn.

## TIXRAAC

Bhagat, R.B., 2004. "*Rural-Urban Migration and Informal Sector Employment in India: A Case Study,"* International Labour Review.

Cabdikariin Shardi. 2020. *Gorfeynta buugga GASO, GANUUN IYO GASIIN*. https://www.laashin.com

Cali Jimcaale Axmed. 2018. *GASO, GANUUN IYO GASIIN.* Katrineholm, Sweden.

Caliqeyr M. Nuur. 2022. *Abtirsiinta Ereyga af Soomaaliga*. Qaahira.

Dayax Cabdi Kulmiye. 2022. *HIBAAD – Kaabaha Horumarka Qoyska*. Muqdisho

Gore, T., Powell, R., & Wells, P. 2006. *The contribution of rural community businesses to integrated rural development*. https://core.ac.uk/

Ina Cubtan. 2020. *Gorfeynta; Gaso, Ganuun iyo Gasiin.* https://www.laashin.com

Maxamed Daahir Afrax. 2020. *GORFEYNTA BUUGGA: GASO, GANUUN IYO GASIIN: QISO JID-BIXIYEEN AH*. https://www.wardheernews.com

United Nations. 2018. *"World Urbanization Prospects."*

Ward, N., & McNicholas, K. 1998. *The future of rural planning.* Journal of Rural Studies. https://www.sciencedirect.com.